MACLUUMAAD MUHIIM AH EE KU SAABSAN KA BADBAADADA IYO AMMAANKA DABKA EE KA DHACA GURIGAAGA DHEXDIISA

RÄDDNINGSTJÄNSTEN KINDA

Viktig information om brandskyddet och säkerheten i din bostad

Språk: Somali

QATARTA DABKA EE GURIGAAGA DHEXDIISA

- Sanad kasta, Sweden dhexdeeda, dhowr kun oo dab wata qatar dhibaato ah ayaa adeegga deg-degga loogu yeeraa. Sidaas awgeed, 100 qof ayaa naftooda ku lunta oo khasaare gaara ilaa SEK 1.1 billion oo qasaare dabka sababey ka soo gaara.

- Intaa mid la mid ah ayaa dab yar yar iyo kuwa lama filaanka ah dhaca. Waxyaabaha sababa ee caamka ah ee guryahay dabka ku dhacaan waa qaladaadka korantada iyo noocyada kale ee kuleylka laga badiyo. Talefishinka dabka qabsada, makiinadaha dharka mayrta iyo sidoo kale makiinadaha dharka qalajisa way ka dhacaan. Marnaba gurigaaga ha uga tagin ayada oo qalabka guryaha ama mashii-nada shidan yihiin ama shaqeynayaan.

- Shumacyada shidan oo laga tagaa ayaa waxay dha-liyaan dab badan oo aan loo baahnayn.

- Shanta dab ee dhaca afarba dab ayaa sabab u ah.

- Dabka ka bilawda digsiga suugada ama taawada foornada (ovan), sida dabka kale, waxay dhaliyaan qaac sun ah. Dabka si sahlan ayuu u fidaa oo gaa-raa meesha sare ee qaaca saarta iyo meelo fog kadib-na aqalka ama dhismaha oo dhan ayuu u gudbaa. Qaaca wuxuu sababa dab badan oo halis ah oo dhiliya dhaawa-cyo iyo qasaaro.

DABKA KA HORTAG

- Qalabka qaylo-dhaanta (fire alarm) waa qalabka dabka ilaaliya ee ugu muhiimsan gurigaaga. Qalabka qaylo-dhaanta wuxuu gartaa qaaca kasta ee ku soo foolan oo wuxuu bilaabaa in dhawaaq beeb ah sameeyo. Qalabka qaaca sheega si joogto ah bata-riyagiisa iskaga hubi. Qalbiga ku hay oo ogow in waxqabadka qalabka qaaca sheega uu toban sanad-dood ka dib bilaabmo in uu xumaado. Goorta waq-taas la gaaro baddel qalabka qaacal.

- Waa mas'uuliyadda milkiilahu in uu hubiyo in aqalka leeyahay qalabka qaaca. Qofka degan guri-ga ayaa mas'uul ka ah in uu hubiyo in qalabka qaaca sheega si hagaagsan u shaqeeyo.

- Marnaba ha iloobin in qalabka qaaca ee hoygaaga xaggaaga ama aqalka gaariga lagu jiido ee guryaha ah in aad hubiso. Sidoo kale waxaa jira qalabyada qaaca qaar aad boorada gashan garto oo aad horey fasaxyada markaad aadeyso aad qaadan karto.

- Si toos ah iskaga hagaaji korantada (strip lighting) adigoon dib uga dhaceyn. Sanad kasta waxaa dhaca boqolaal dab oo ay sababeen nalalka loo yaqaano (strip lighting) ee cilladeysan.

- Badanaaba 100 ama ka badan ee dabaka qatarta ee guryaha ka dhaca sanad kasta waxaa ugu wacan in guryahu ka maqan yahay qalabka qaaca oo shaqeynaaya.

TALOOYINKA KALE WANAAGSAN EE LOOGA FOGAADO DADKA

- Shumacyada iskaga taxadir. Samee qoraal ku xusuusiya "shumaca ha iloobin" oo aad albaaka hore aad gadaal uga dhejineyso.

- La imow caado ah in aad TV-ga ka demiso halka laga demiyo. TV-ga ka fogee in aad dhigto barta guugta la dhigto ama meelo kale oo boor ku uruuri karta oo kuleyl ku dhalan karta.

- Bareesada ka siib mashiinka gaxwada iyo mashiinka rootiga lagu kululeeyo goorta aad isticmaasho ka dib.

- Hubi in marwaxda iyo foornada marwaxada qaaca ka sifaysan yihiin dufanta.

BARO IN TALAABO QAADO IN AAD HADDII DAB DHACO

Dabka dhamaan in yar bay ku bilawdaan. Sidaa darteed waxaa muhiim ah in la garanaayo sida talaabo si dhaqso ah loo qaado haddii ay dhacdo in dab bilowdo. Xeerka aassasiga waa **GURMAD – FEEJIGNAAN – ADEEGA GURMADKA DEG DEGGA KA WAC 112 – DAMI.**

- **Dabka taabada qabsado.** Digsiga dabka ka dhaqaaji. Dabool dabka digsiga qabsadey. Marnaba biyo ha isticmaalin haddii dab qabsado saliid baruur, saliid ama baruur kale.

- **Dabka TV-ga qabsado.** Waxay badanaaba ka bilaabataa qaac ka yimaada TV-ga. Marka hore bareesada ka soo saar daloolka derbiga, ka dibna biyo dusha kaga shub oo isku day in aad dibada meel furan keento (tusaale ahaan sida balkaniga guriga).

- **Dabka kale.** Haddii dab yar uu dhaco oo aad haysato qalabka lagu damiyo markaa dabka ka soo abaar meel hoosaad ah oo ka meel dhaxe dabka kaga buufi. Qiiqa halka hoose ku gurguuro

- **Haddii aadan karin in kaligaaga aad damiso.** Xir albaabka halka dabka uu ka bilawday, u yeer adeega deg degga oo ka dibna guriga ka soo bax. FG. Iska hubi in aad albaabka guriga aad xirto!

- Fekradda guud. **QAACA HOOSTIISA KU SOCO** oo **DADBKA ALBAABKA KU XIR.**

MACLUUD MUHIIM AH

Haddii dab uu ka jiro meel kale ee dhismaha oo aanan taadii dhexdeeda ahayn waa in aad ka fekartaa waxyaabaha soo socda:

- Marka aad dibada u baxayso marnaba jaranjarada ha ku bixin haddii jaranjarada qaac ka socdo. Qaaca si dhaqso ah ayuu u faafaa oo waa dilaa.

- Gurigaaga ku sii jir; halkaas ayaa ah halka ugu wanaagsan ee aad ku amaan baxeyso.

- Albaabka gurigaaga dabka waxay ka iska celin kartaa ugu yaraan 30 daqiiqadood.

- Haddii aad ka wal waleyso, wac 112. Haddii adeegga deg degga ay halkaasi joogaan markaa isku soo jeedi adiga oo daaqadda ama balkaniga gurigaaga soo istaagaya.

- Sug amarka ay adeegga deg degga ku siinayaan.

WACISTA ADEEGYADA DEG DEGGA

Goorta aad wacdo 112 waxaad soo gaartey xarunta adeegga deg degga ee SOS Alarm. Ka jawaab su'aalaha gudbiyaha SOS, marka aad sidaa sameyso waxaad heleysaa adeeg gargaar oo dhaqso ah uguna wanaagsan. Goorta aad wal gudbiye su'aalo kaa weydiinayo mid kale ayaa bilaaba in uu u yeero dab damiska adiga kuugu dhow

- U diyaar garow in aad u gudbiyaha SOS tilmaamo ka qaadato.

- La kulan oo tusi halka gargaarka looga baahan yahay.

- Mar labaad ayaad SOS 112 soo wici kartaa haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.

- U diyaar garow in dhab ahaan dab dhib ama shil ay suurto gal tahay in waqti kasta dhaco. Ka fekir talaabada aad qaadi doonto haddii aad u baahto in aad SOS 112 u yeerto.

LIIS-WARBIXINEED KA BADBAADISTA EE GURYAHAAGA DHEXDIISA

BUUXI OO HUBI BADBAADA DABKA EE GURIGAAGA DHEXDIISA

Liis-warbixineed amaanka adiga iyo deriskaagaba u wanaagsan

Liiskan raac oo hubi ka hortagga dabka ee gurigaaga dhexdiisa iyo dhismahaaga.

- ❑ Ugu yaraan guriga waa in uu lee yahay hal ah qalabka qaylo-dhaanta (smoke detector) qaaca.
- ❑ Hubi in qalabka qaylo-dhaanta shaqeeyo.
- ❑ Hubi qalabka korantada guriga. Fiilooyinka korantada ma fiiqan yihiin? Bareesada derbiga ma dibacsan yihiin?
- ❑ Iska hagaaji halka fiilada korantada aanu sida isugu xirnayn. Qaladaadka korantada waa midda ugu badan ee dabka sababta.
- ❑ Shumaca ha saarin TV-ga dushiisa.
- ❑ TV-ga waa inuu ahaadaa mid kaligii meel yaala. TV-ga ka demi barta laga demiyo ee off-buttonka.
- ❑ Iska hubi in ciyaalka aad ka fogeyso taraqa (kibriidka) iyo qarxisada sigaarka lagu shito.
- ❑ Korantada ka saar goorta aad makiinada gaxwaha iyo tan rootiga dhameyso isticmaalkooda.
- ❑ Marnaba ha ku hayn waxyaabaha dabka si sahal u qabsada qeybta hoose ee guryaha ama qolka guriga lagu agdhiso.
- ❑ Iska hubi in sifeeyaha iyo marwaxada qaaca saarta aysan dufan la hayn.
- ❑ Iska hubi in qashinka aan loo baahnayn iyo warqaddaha jaraa'idka aysan isugu tagi jaranjarada, qeybta hoose ee guryaha ama qolka lagu agdhiso.
- ❑ Qashin gudbiyaha jaranjarada waa in markasta xirnaadaa.
- ❑ Kontaynar dibada ma yaaliin? Masaafada ugu amaansan ee kontaynarka daboolan waa 4 meter kan furanna waa 6 meter.
- ❑ Albaabka aqalka hoose ee guryaha iyo kan aqalka banaanka ka ah waa in ay markasta xirnaadaan.
- ❑ Guriga waa in uu la'hadaa ugu yaraan hal dab demiyah gacanta lagu qabsado. (Kan lagula talinaayo waa nooca: 6 kg ABC powder).
- ❑ Marka ugu horeyso, ula xiriir milkiilaha haddii aad rumeysan tahay in ay wax ka dhiman yihiin difaaca dabka ee jira. Haddii aad su'aalo qabto markasta waa lagugu soo dhaweynayaa in aad soo wacdo adeegga deg degga ee degmadaada.

Haddii dab uu kaco

Gurmad, feejignaan, u yeer adeegga deg degga oo dami: kuwan waa afarta qodob ee ugu muhiimsan ee xusuuso goorta dab uu kaco.

- U gurmad dadka qatarta ku jira, uga dig kuwa kaa ag dhow oo adeegga deg degga ka wac 112.
- Isku day in aad dabka damiso haddii qalabka dab damiyaha ama tuubo, balse ha qaadin Qatar aan loo baahnayn ha qaadin!
- Haddii qolka qaac buuxiyo – qaaca hoostii ku garguuro. Hawo ayaa jirta sagxadda dabaqa hoose.
- Xir albaabka halka dabka uu ka jiro.
- Gurigaaga iskaga jir haddii dabka uu ka dhaco qeyb kale oo ka mid ah dhismaha. Dibada ha uga bixin jaranjarada haddii halka qaac uu ka jiro. Haddii aad caawinaad u baahan tahay markaa wac 112.

Kas dab u kicin

Dab badan ayaa si ula kac ah loo bilaabaa. Sanad kasta Sweden dhexdeeda waxaa jira ilaa iyo 10 000 kaysas oo kas dab u kicin ah. Inaga caawi la dagaalankeena dab kas u kicinta.

- Ka feejignaan shaqsiyaadka aan fasax u haysan.
- Marnaba warqaddaha jaraa'idka, baakadaha iyo waxyaabaha la midka ah ha ku xarayn aqalka hoose ama aqalka hoose uu guriga ku dhega.
- Xir albaabka aqalka hoose iyo aqalka hoose ee guriga.
- Iska hubi in uu xiran yahay gudbiyaha qashinka ee jaranjarada.
- Haddii aad hayso macluumaad la xiriira dab markaa boliiska ula xiriir.

©Copyright 2019 #INFORMATIONSBOLAGET